



mamamundo

www.mamamundo.ch

Fasalada dhalashada carruurta ee luqaddaada ku baxaya

Deutsch • Shqip • தமிழ் • English • Soomaali • عربي • Español
ትግርኛ • خونت رابگير • Português • Українська

SOMALISCH • ZÜRICH

HADDII AAD KU HADASHO LUQAD KALE, FADLAN NALA SOO XIDHIIDH OO
WAXAANU ISKU DEYI INAANU KUU ABAABULNO TURJUMAAN



Xiisadaha dhalmada carruurta ee haweenka/lamaanaha ee adduunka oo dhan

Kooraska waxaa loogu tala galay haweenka hooyooyin ku noqon doona meel ka fog wadankooda hooyo.

Umulisada iyo turjubaaku waxay ka jawaabi doonaa su'aalahaaga oo waxay kugu wargelin doonaa wax ku saabsan uurka, dhalmada, naas nuujinta iyo wakhtiga ilmahaaga xaga guriga.

Waxa ay ku tusi doonan sida aad isugu dejinayso ama nafisayso jimicsiyada jidhka oo ugu diyaar garoobayso dhalmada. Waxaad kala hadli kartaa haweenka kale waayo aragnimadaada iyo filashooyinka ku saabsan wakhtigan gaarka ah. Sidoo kale waxaad barbar dhigi kartaa caadooyinka dhawqanka haweenka kale.

Koorasadan waxay u dhacaysaa todoba qaybood. Waxaa lagu talinayaa inaad booqato kooraska inta uu uurkagu u dhaxeeyo 5 ilaa 9 bilood.



Goobta koorsada

Stadtspital Triemli
Pavillon E2
Birmensdorferstrasse 497
8063 Zürich



Kharashka

Khidmadaha koorasku waa kuwa dakhliga ku xiran. Waxaa jira sanduuq loogu talo galay qoysaska aan lahayn hanti dhaqaale. Kharashka koorsada ee hadda waxaa laga heli karaa boggayaga internetka:
www.mamamundo.ch/de/zuerich/somali-zh/



Ka qayb noqoshada / La xidhiidh

www.mamamundo.ch/de/zuerich/somali-zh/

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan email:
admin.mamamundo-zh@hin.ch

Fadlan sheeg lambarka telefoonkaada si uu qof kuugula soo xiriiro luqadaada.